# Baadhitaanada indhaha ee lagu sameeyo dhallaanka dhasha xilli hore

Macluumaad ku socda waalidiinta



VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN

Dhammaan carruurta ku dhasha xilli hore waxa si joogto ah u baadha dhakhtarka indhaha si uu u ogaado carruurta u baahan daawaynta cudurka, ROP ( retinopathy of prematurity ), taas oo saameyn karta isha ka dib dhalashada dhicisnimada ah.

## Koriinka caadiga ah

Ratiinada isha waxay u fadhidaa sida gidaarka isha gudaheeda oo kale waxayna ka kooban tahay unugyo aragga ah oo qabta dareen muuqaalada una gudbiya neerfaha araga maskaxda halkaas oo lagu farsameeyo laguna tarjumo. Xididdada dhiigga ee indhaha waxay bilaabaan inay ka soo koraan dareemaha aragga toddobaadyada 14-15aad ee uurka waxayna caadi ahaan daboolaan dhammaan ratiinada isha waqtiga uurka markuu dhamaystirmo.


## ROP

Haddii la dhasho wakhti hore, korriinka xididdada dhiigga ee ratiinada isha ayaa khalkhal geli karta, marba sida loo hor dhasho ayay khatarta usii badantahay in korriinka xididdada isha uusan caadi noqonin. In ka yar 5% dhammaan kuwa la baadho ayaa waxaa laga yaabaa inay yeeshaan isbeddello halis ah oo u baahan in lagu daaweeyo laysarka si looga hortago go'idda ratiinada isha iyo luminta aragga. Inta badan, daawaynta ayaa saameyn wanaagsan reebta, Iswiidhan maanta aad ayey dhif u tahay in ilmuhu uu indho la'aan ku dhacdo ROP awgeed. ROP waxa loo qaybiyaa heerar kala duwan sida ku sharaxan sawirka.

## Baaritaanada indhaha

Si loo ogaado carruurta u baahan daawaynta ROP, waxaa dalka Iswiidan lagu sameeyaa baaritaanno dhanka indhaha ah oo lagu sameeyo dhammaan carruurta dhasha ka hor toddobaadka 30aad ee uurka. Baaritaanka ugu horreeya waxaa lagu sameeyaa da'da markay gaarto 1-2 bilood ka dibna baaritaanku wuxuu sii socdaa 1- 2 usbuuc walba ilaa ratiinada isha ay daboolaan xididdada dhiigga, taasoo badanaa dhacda marka ilmuhu dhameystirmo oo uu gaaro da' u dhiganta 40 toddobaad oo uur ah.

Baaritaanka ka hor, cunugga waxaa la siiyaa dhibco indhaha ah oo bu'da isha weyneysa. Tani waxay ilmaha ka dhigtaa mid xasaasi u ah iftiinka inta




*Heerka 1aad, korriinka xididka ayaa joogsaday muddo gaaban iyo heerka 2aad, korriinka xididka ayaa joogsaday muddo dheer. Heerka 1aad iyo 2aad inta badan si caadi ah ayay u baaba'aan. Heerka 3aad, xididdada dhiigga ayaa u kora si aan caadi ahayn oo aan la xakamayn karin waxaana laga yaabaa inay u baahdaan daawaynta laysarka si looga hortago in ratiinaha isha uu go'o. Heerka 4aad, qayb ka mid ah ratiinada isha ayaa ka go'ay booskeeda, heerka 5aad, dhammaan ratiinada isha ayaa go'ay.*

ka hadhay maalintaas, markaa ka fikir inaad ilaaliso ilmahaaga wax yar oo dheeraad ah. Dhakhaatiirta indhaha sida caadiga ah waxay isticmaalaan kaamarad si ay u sawiraan isha salkeeda, laakiin sidoo kale waxay isticmaali karaan laambad iyo muraayadda weynaynta oo lagu qabto isha korkeeda. Inta lagu jiro baaritaanka, daboolka indhaha ayaa loo baahan yahay in la kala fogeeyo taasna waxaa caadi ahaan fududeeya cunugga oo nasiino gala isaga oo nuugaya caanaha naasaha ama wax sonkoreysan. Inta lagu jiro baaritaanka kaamarada, ilmuhu waxaa la siinayaa dhibcaha suuxinta ee indhaha. Baadhitaannada indhuhu waxay dhammaadaan marka korriinka xididdada dhiigga lagu qiimeeyo inuu dhammaystiran yahay, haddii ilmaha la daweeyey iyo in kaleba. Haddii ROP uusan dib u noqonin iyo haddii korriinka xididada aysan dhameystirmin oo ilmahaagu u guuro qayb kale

ama isbitaal kale, waxaa muhiim ah in la sii wado baaritaanka indhaha ee qaybta cusub ee la geeyay ama rugta caafimaadka indhaha ee uu ilmahaagu ka tirsan yahay.

## Daawaynta

Daawaynta Laysarka waa nooca ugu badan ee daawaynta waxaana loo isticmaalaa si loo yareeyo korriinka xididdada aan caadiga ahayn ee qaybta sare ee ratiinada isha waxaana badanaa lagu sameeyaa suuxdin. Inta badan kiisaska daawadu waxay leeyihiin saameyn wanaagsan aad ayayna dhif u tahay in ilmuhu uu indho la'aan la noqdo cudurka ROP dartiis. Xaaladaha qaarkood, si kastaba ha ahaatee, daawaynta laysarka oo dhowr ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo mararka qaarkoodna nooc kale oo daaweyn ah ayaa sidoo kale loo isticmaalaa sida daawada (Anti-VEGF) oo isha lagu shubo iyadoo suuxsan ama degen. Daawayntani waxay sidoo kale hoos u dhigtaa korriinka xididdada ee aan caadiga ahayn waxayna yaraynaysaa khatarta ah inay go'aan indhaha.

## Maxaa xiga oo dhacaaya?

Ka hor inta aan ilmahaaga loo oggolaan inuu guriga aado ama u guurin qayb kale ama isbitaal kale, waxaa muhiim ah in mas'uuliyiintu diyaariyaan waqti baaritaan oo ka dhaca gudaha qaybta cusub ama rugta caafimaadka indhaha ee uu ilmahaagu ka tirsan yahay. Dhallaanka dhasha xilli hore waxay leeyihiin halis dheeraad ah oo ah indho-weershinimo iyo khaladaadka kala go'a aragga oo u baahan in lagu daweeyo muraayadaha indhaha, iyo haddii aad ka shakisan tahay in ay wax ka qaldan yihiin aragga ilmahaaga ama haddii aad su'aalo kale qabtid, waxaad kusoo dhaweynaysaa inaad nagala soo xiriirto Rugta caafimaadka indhaha ee carruurta ee Isbitaalka carruurta ee Boqoradda Silvia adigoo soo wacaaya 1177.

## Diiwaanka tayada

Si kor loogu qaado tayada daryeelka caafimaadka, waxaanu ku ururinnaa macluumaadka ku saabsan ilmahaaga diiwaanka tayada (www.SWED-ROP.com). Ilmahaagu waxa uu xaq u leeyahay in aan la diwaangelin oo xogtooda waa laga saari karaa. Lasoo xiriir markaa rugta caafimaadka indhaha ee carruurta, Isbitaalka Jaamacadda ee Sahlgrenska.

*Xuquuqda daabacaada Ann Hellström 2022*

VGR6435